**DOWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**XAFIISKA**
**GARYAQAANKA GUUD**

**ولاية بونت لاند**
**الصومالية**
**مكتب**
**المحامي العام للدولة**

# PUNTLAND STATE OF SOMALIA
# OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 23AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 15/08/23 | Lam. 03 |
|---|---|---|---|


## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

# WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA MAAMULKA GOBOLADDA, DEGMOOYINKA IYO DHISMAHA DOWLADAHA HOOSE PUNTLAND

**TUSMADA**


| | |
|---|---|
| Qeybta 1aad | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Goboladda, Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose Puntland** |
| Qeybta 2aad | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 3aad | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| Qeybta 4aad | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| Qeybta 5aad | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 03 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Goboladda, Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/52/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedelka Sharciga Maamulka Goboladda, Degmooyinka iyo Dhismaha Dowladaha Hoose Puntland

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

ولاية بونت لاند الصومالية مكتب الرئيس
Office of the President
Puntland State of Somalia

Tell: +252-090-7797147; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/52/2023** **Garoowe, Khamiis,** **Taariikh:- 10/08/2023**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo: - Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:-** | Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64**-aad |
| **MARKUU ARKAY:-** | Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/124/2023 ee July 22, 2023, kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Goleyaasha Deegaanka Puntland. |
| **MARKUU TIX-GELIYEY: -** | Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismahaa Goleyaasha Deegaanka Puntland. |
| **MARKUU DHEGEYSTEY: -** | Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, Fadhigiisii 19-aad ee 10.08.2023 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Maamulka Gobolllada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa **(36)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol **(34)** Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen **(2)** Mudane. |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawlaha Hoose Puntland**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

## DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

### GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# WAX-KA-BEDELKA XEERKA MAAMULKA GOBOLLADA, DEGMOOYINKA IYO DHISMAHA DAWLADAHA HOOSE EE DAWLADDA PUNTLAND

**GAROOWE, AGOOSTO, 2023**

**Tusmada** **Bogga**

CUTUBKA 1-aad ........ 1
QODOBO GUUD........ 1
Qodobka 1-aad ........ 1
Erey Bixin........ 1
Qodobka 2-aad ........ 1
Magaca & Ujeeddada Xeerka ........ 1
Qodobka 3-aad ........ 1
Baaxadda Xeerka ........ 1
CUTUBKA 2-aad ........ 2
MAAMULKA GOBOLLADA ........ 2
Qodobka 4-aad ........ 2
Qaab-Dhismeedka Dalka Puntland ........ 2
Qodobka 5-aad ........ 2
Gobollada iyo Degmooyinka Puntland ........ 2
Qodobka 6-aad ........ 3
Habka Maamulka Gobollada ........ 3
Qodobka 7-aad ........ 3
Golaha Horumarinta Gobolka ........ 3
Qodobka 8-aad ........ 3
Waajibaadka Golaha Horumarinta Gobolka ........ 3
Qodobka 9-aad ........ 3
Guddiga Nabadgelyada Gobolka ........ 3
Qodobka 10-aad ........ 4
Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka ........ 4
Qodobka 11-aad ........ 4
Shuruudaha Magacaabidda Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku-Xigeennadiisa ........ 4
Qodobka 12-aad ........ 4
Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiyaha Gobolka ........ 4
Qodobka 13-aad ........ 5
Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka ........ 5
Qodobka 14-aad ........ 5

Guddiga Fulinta ee Gobolka ........ 5
Qodobka 15-aad ........ 6
Xilka iyo Waajibaadka Isuduwaha Dawladaha Hoose ee Gobolka ........ 6
CUTUBKA 3-aad ........ 6
UNKIDDA MAAMULKA D/HOOSE ........ 6
Qodobka 16-aad ........ 6
Habka Maamulka D/hoose ........ 6
Qodobka 17-aad ........ 7
Shuruudaha Degmo Lagu Bixin Karo ........ 7
Qodobka 18-aad ........ 7
Shuruudaha Degsiimo Lagu Aqoonsan Karo ........ 7
Qodobka 19-aad ........ 7
Shuruudaha Tuulo Lagu Aqoonsan Karo ........ 7
Qodobka 20-aad ........ 7
Derejooyinka Degmooyinka ........ 7
Qodobka 21-aad ........ 8
Soohdimaha Degmooyinka ........ 8
CUTUBKA 4-aad ........ 8
QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA D/HOOSE ........ 8
Qodobka 22-aad ........ 8
Qodobka 23-aad ........ 8
Shuruudaha Doorashada Xubnaha Golaha Deegaanka ........ 8
Qodobka 24-aad ........ 9
Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Golaha Deegaanka ........ 9
Qodobka 25-aad ........ 10
Xasaanadda Golaha Deegaanka ........ 10
Qodobka 26-aad ........ 10
Tirada Golayaasha Deegaanka ........ 10
Qodobka 27-aad ........ 11
Kala-Dirista Golayaasha Deegaanka ........ 11
Qodobka 28-aad ........ 12
Awoodaha Golaha Deegaanka ........ 12

Qodobka 29-aad ............ 14

Doorashada Guddoomiyaha/Duqa Degmada iyo Ku-Xigeenkiisa ............ 14

Qodobka 30-aad ............ 15

Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka / Duqa degmada ............ 15

Qodobka 31-aad ............ 16

Awoodda iyo Waajibaadka Ku-Xigeenka Gudoomiyaha Golaha Deegaanka ............ 16

Qodobka 32-aad ............ 17

Xil-Waayista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka Ahna Duqa Degmada iyo Ku- Xigeenkiisa ............ 17

Qodobka 33-aad ............ 17

Guddiga Fulinta Golaha Deegaanka ............ 17

Qodobka 34-aad ............ 18

Waajibaadka Guddiga Fulinta ............ 18

Qodobka 35-aad ............ 18

Qabsoomid La'aanta Doorashada Golayaasha Deegaanka ............ 18

Qodobka 36-aad ............ 19

Magacaabista iyo Xil-Ka-Qaadista Xoghayaha D/hoose ............ 19

Qodobka 37-aad ............ 19

Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha D/hoose ............ 19

Qodobka 38-aad ............ 20

Shuruudaha Lagu Xulanayo Xoghayaha D/hoose ............ 20

Qodobka 39-aad ............ 20

Guddiga Joogtada Ah ............ 20

Qodobka 40-aad ............ 20

Kulamada iyo Go'aamada Guddiga Joogtada Ah ............ 20

Qodobka 41-aad ............ 21

Guddiga Maamulka Xaafadaha ............ 21

Qodobka 42-aad ............ 21

Maamulka Degsiimada iyo Guddiyada Tuulooyinka ............ 21

Qodobka 43-aad ............ 22

Awoodaha Guddiga Maamulka Degsiimada iyo Tuulada ............ 22

Qodobka 44-aad ............ 22

Shirarka Golaha Deegaanka ............ 22

Qodobka 45-aad .......... 23
Ansaxa Shirarka Golaha Deegaanka .......... 23
Qodobka 46-aad .......... 23
Hadal Qoraalka iyo Diiwaan Gelinta .......... 23
Qodobka 47-aad .......... 24
Mushaharka iyo Gunnooyinka Golayaasha Deegaanka .......... 24
Qodobka 48-aad .......... 24
Guddiga Nabadgelyada Degmada .......... 24
CUTUBKA 5-aad .......... 25
AWOODAHA MAAMUL IYO XEER-DEJIN EE D/HOOSE .......... 25
Qodobka 49-aad .......... 25
Waaxyaha Dowladaha Hoose .......... 25
Qodobka 50-aad .......... 25
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Qorshaynta .......... 25
Qodobka 51-aad .......... 25
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Bixinta Adeegyada Bulshada .......... 25
Qodobka 52-aad .......... 26
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Nadaafadda iyo Fayo-Dhawrka .......... 26
Qodobka 53-aad .......... 26
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Maamulka Hawlaha Guud .......... 26
Qodobka 54-aad .......... 27
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Shaqaalaha .......... 27
Qodobka 55-aad .......... 27
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Diiwaan-Gelinta Dadka .......... 27
Qodobka 56-aad .......... 28
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Iibka iyo Qandaraasyada .......... 28
Qodobka 57-aad .......... 29
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Xeer-Dejinta .......... 29
Qodobka 58-aad .......... 29
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Heshiis Gelidda .......... 29
Qodobka 59-aad .......... 30
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Deegaanka .......... 30

Qodobka 60-aad ........ 30
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Diinta iyo Dhaqanka Suuban ........ 30
Qodobka 61-aad ........ 30
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Xoolaha, ........ 30
Kalluumaysiga iyo Beeraha ........ 30
Qodobka 62-aad ........ 31
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Fanka, ........ 31
Suugaanta iyo Ciyaaraha ........ 31
Qodobka 63-aad ........ 31
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Ganacsiga ........ 31
Qodobka 64-aad ........ 31
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Canshuuraha iyo Ururinta Dakhliga ........ 31
Qodobka 65-aad ........ 32
Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Dab-Damiska ........ 32
CUTUBKA 6-aad ........ 32
XIRIIRKA U DHEXEEYA DAWLADDA IYO D/HOOSE ........ 32
Qodobka 66-aad ........ 32
Xiriirka Wasaaradda iyo D/hoose ........ 32
Qodobka 67-aad ........ 33
Kaalinta Wasaaradaha La Shaqeeya D/hoose ........ 33
CUTUBKA 7-aad ........ 34
XISAABAADKA, DABAGALKA IYO MIISAANIYADDA ........ 34
Qodobka 68-aad ........ 34
Habka Xisaabaadka ........ 34
Qodobka 69-aad ........ 34
Mas'uuliyadda Xisaabaadka ........ 34
Qodobka 70-aad ........ 35
Daba-galka iyo Baarista Xisaabaadka D/hoose ........ 35
Qodobka 71-aad ........ 35
Miisaaniyadda ........ 35
Qodobka 72-aad ........ 36
Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda ........ 36

CUTUBKA 8-aad ........ 37
ILAHA DAKHLIGA ........ 37
Qodobka 73-aad ........ 37
Canshuuraha ........ 37
Qodobka 74-aad ........ 38
Macaashka Ganacsiga iyo Kirooyinka ........ 38
Qodobka 75-aad ........ 39
Amaahda ........ 39
Qodobka 76-aad ........ 39
Deeqaha iyo Kabista Dhaqaale Ee Dowladda dhexe ........ 39
CUTUBKA 9-aad ........ 40
DAKHLIGA IYO KHARASHKA ........ 40
Qodobka 77-aad ........ 40
Uruurinta Dakhliga ........ 40
Qodobka 78-aad ........ 40
Kharashka ........ 40
CUTUBKA 10-aad ........ 41
DEMBIYADA IYO RACFAANKA ........ 41
Qodobka 79-aad ........ 41
Racfaanka ........ 41
Qodobka 80-aad ........ 41
Ciqaabaha ........ 41
CUTUBKA 11-aad ........ 41
QODOBADA GUNAANADKA ........ 41
Qodobka 81-aad ........ 41
Maaraynta Hantida ........ 41
Qodobka 82-aad ........ 42
Soo Saarista Xeer Nidaamiyeyaal ........ 42
Qodobka 83-aad ........ 42
Burin/Laalid ........ 42
Qodobka 84-aad ........ 42
Dhaqan-galka Xeerka ........ 42

# CUTUBKA 1-aad
# QODOBO GUUD
## Qodobka 1-aad
## Erey Bixin

Xeerkan, haddii aan ereyadaan si kale loo macneyn, waxay yeelanayaan erey bixinta soo socota:-

***"Dowlad"*** waxaa loola jeedaa Dowladda Puntland ee Soomaaliyeed.

***"Dastuur"*** waxaa loola jeedaa dastuurka Dowladda Puntland ee Soomaaliyeed.

***"Garsoor"*** waxaa loola jeedaa maxkamadaha iyo xeer ilaalinta Puntland sida ku xusan qodobka 89-aad ee Dastuurka Dowladda Puntland ee Soomaaliyeed.

***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta Dawladda Puntland.

**"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dimuqraadiyeynta.

***"Xeerka Ciqaabta Guud"*** waxaa loola jeedaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee xeer No.5 ee soo baxay sannadkii 1962.

## Qodobka 2-aad
## Magaca & Ujeeddada Xeerka

1. Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Maamulka Gobollada, Degmooyinka iyo Dhismaha Dawladaha Hoose ee Dawladda Puntland.
2. Ujeeddada xeerkani waa in lagu maamulo gobollada, degmooyinka, dhismaha golayaasha deegaanka iyo dawladaha hoose ee Puntland.

## Qodobka 3-aad
## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu maamulayaa dhammaan gobollada, golayaasha deegaanka degmooyinka iyo dawladaha hoose ee Puntland guud ahaan iyadoo laga duulayo qodobada 120-aad,121-aad,122-aad,123-aad, 124-aad, 125-aad, 126-aad iyo 127-aad ee dastuurka dawladda Puntland.

## CUTUBKA 2-aad
## MAAMULKA GOBOLLADA
### Qodobka 4-aad
### Qaab-Dhismeedka Dalka Puntland

1. Qaab dhismeedka Dalka Puntland wuxuu ka kooban yahay gobollo, gobol kastana wuxuu u kala baxaa degmooyin, degsiimooyin iyo tuulooyin.
2. Caasimadda dawladda Puntland waa magaalada Garoowe waxayna yeelan doontaa xeer u gaar ah.

### Qodobka 5-aad
### Gobollada iyo Degmooyinka Puntland

1. Dawladda Puntland waxay u qaybsantaa Sagaal (9) Gobol, waxayna kala yihiin; Gobollada Nugaal, Bari, Sool, Sanaag, Mudug, Haylaan, Karkaar, Cayn iyo Raascasayr.
2. Gobol kasta wuxuu u qaybsamaa Degmooyin, Degsiimooyin iyo Tuulooyin.
3. Degmooyinka derejadoodu waxay kala yihiin A, B iyo C.
4. Magaalo madaxda gobol kasta derejadeedu waa "A" waana kuwan soo socda.

| Tiro | Gobolka | Magaca Magaalo-Madaxda | Derejada Degmada |
|---|---|---|---|
| 1. | Gobolka Nugaal | Garoowe | A |
| 2. | Gobolka Bari | Boosaaso | A |
| 3. | Gobolka Sool | Laas-caanood | A |
| 4. | Gobolka Sanaag | Badhan | A |
| 5. | Gobolka Mudug | Gaalkacayo | A |
| 6. | Gobolka Haylaan | Dhahar | A |
| 7. | Gobolka Karkaar | Qardho | A |
| 8. | Gobolka Cayn | Buuhoodle | A |
| 9. | Gobolka Raascasayr | Caluula | A |

## Qodobka 6-aad
## Habka Maamulka Gobollada

1. Puntland waxay ku dhaqmaysaa hannaanka mabaadi'da baahinta maamulka.
2. Si loo hir-geliyo baahinta maamulka dawladda, dalku wuxuu u qaybsan yahay gobollo iyo degmooyin.
3. Xukuumadda ayaa mas'uul ka ah dib-u-habaynta iyo kala xadeynta gobollada iyo degmooyinka sida ku cad qodobka 120-aad farqadiisa 3-aad ee dastuurka Puntland, iyadoo la raacayo hab-raaca ku xusan qodobka 21-aad farqadiisa 2-aad ee xeerkan.

## Qodobka 7-aad
## Golaha Horumarinta Gobolka

Gobol waliba waxa uu yeelanayaa gole horumarin gobol oo ka kooban:

1. Guddiga fulinta gobolka.
2. Madaxda Wasaaradaha dawalada ee heer gobol.
3. Guddoomiyayaasha degmooyinka (Duqawda Degmooyinka) ee gobolku ka kooban yahay.

## Qodobka 8-aad
## Waajibaadka Golaha Horumarinta Gobolka

Golaha horumrinta Gobolku wuxuu u-xil-saaran yahay;

1. Isuduwidda qorshaha horumarinta ee degmooyinka gobolku ka kooban yahay.
2. Habaynta hawlaha laamaha dawladda ee heer gobol.
3. Kormeerka habsami u socodka hawlaha degmooyinka.
4. Talo ka bixinta horumarinta degmooyinka.

## Qodobka 9-aad
## Guddiga Nabadgelyada Gobolka

Guddiga nabadgelyada gobolku waxa uu ka kooban yahay:

1. Guddoomiyaha iyo ku-xigeennada.
2. Madaxda Laamaha amniga ee heer gobol.

3. Guddoomiyayaasha degmooyinka (Duqawda Degmooyinka) ee gobolku ka kooban yahay.

## Qodobka 10-aad
## Waajibaadka Guddiga Nabadgelyada Gobolka

Guddiga nabadgelyada gobolku;-

1. Wuxuu ilaaliyaa xasiloonida gobolka.
2. Wuxuu ka hortagaa denbiyada abaabulan ee gobolka looga cabsi qabo.
3. Waxay go'aamadooda u soo gudbiyaan Wasaaradaha Arrimaha Gudaha iyo Amniga iyadoo mar kasta ogaysiin la siinayo Madaxweynaha.

## Qodobka 11-aad
## Shuruudaha Magacaabidda Guddoomiyaha Gobolka iyo Ku-Xigeennadiisa

1. Guddoomiyaha Gobolka iyo ku-xigeennadiisa waxaa lagu magacaabayaa Digreeto Madaxwayne isagoo dhegaystay talo soo jeedinta Wasiirka.
2. Qofka noqonaya guddoomiye gobol waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
    - b) Waa inuu yahay muwaadin Puntlander ah, Muslim ah, gutana waajibaadka diiniga ah.
    - t) Waa inaan da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.
    - j) Waa inaan xuquuqdiisa muwaadinnimo la laalin 5-tii sano ee ugu dambeysey.
    - x) Waa inuu leeyahay aqoon sare iyo waayo-aragnimo maamul.
    - kh) Waa inuu xog-ogaal u yahay duruufaha iyo dhibaatooyinka gobolka.

## Qodobka 12-aad
## Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiyaha Gobolka

1. Guddoomiyaha Gobolku waa madaxa u sareeya laamaha dowladda ee heer gobol, wuxuna guddoomiyaa shirarka guddiyada horumarinta, nabadgelyada iyo fulinta ee gobolka.
2. Wuxuu guddoomiyaa kulamada ay isugu yimaadaan guddiyada joogtada ah ee golayaasha degmooyinka.
3. Wuxuu kormeeraa adeegyada iyo hawl-galada xukuumadda ee gobolkiisa.

4. Waa isku-xiraha maamulka dhexe ee Puntland iyo maamullada degmooyinka ee gobolkiisa.
5. Wuxuu fuliyaa awaamiirta dowladda ee siyaasadda, nabadgelyada iyo maamulka.
6. Wuxuu bil kasta war bixin siiyaa laamaha dowladda ee heer-gobol iyo Wasaaradda ee dhinacyada siyaasadda, nabadgelyada, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.
7. Wuxuu fuliyaa dabagalna ku sameeyaa meelmarinta xeerarka dowladda ee heer-gobol.
8. Wuxuu magacaabi karaa guddiga xallinta khilaafaadka ee heer-gobol.

## Qodobka 13-aad
## Awoodaha iyo Xilalka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka

1. Guddoomiye ku-xigeenku waa mas'uulka labaad ee gobolka.
2. Guddoomiye ku-xigeenku waxa uu fuliyaa dhammaan xilka guddoomiyaha gobolka marka uu maqan yahay ama uu gudan waayo xilkiisa sabab kasta haku timaadee.
3. Wuxuu guddoomiyaha kala taliyaa arrimaha nabadgelyada iyo maamulka.
4. Wuxuu fuliyaa wixii hawl ah ee gudoomiyuhu u-xil-saaro oo aan ka baxsanayn awoodda iyo xilka guddoomiyaha.

## Qodobka 14-aad
## Guddiga Fulinta ee Gobolka

Guddiga fulinta ee Gobolku wuxuu ka kooban yahay:

b. Guddoomiyaha gobolka.

t. Ku-xigeennadiisa.

j. Iyo Isuduwaha dowladaha hoose ee gobolka.

## Qodobka 15-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Isuduwaha Dawladaha Hoose ee Gobolka

Isuduwaha Dawladaha hoose ee Gobolku;

1. Waa sarkaalka Saddexaad ee maamulka gobolka.
2. Wuxuu isu-duwaa warbixinnada laamaha dawladda ee gobolku ka kooban yahay, warbixinna ka siiyaa guddoomiyaha.
3. Wuxuu mas'uul ka yahay isu-duwidda Miisaaniyadda dawladaha hoose ee gobolka, waxa uuna hor-dhigaa guddiga fulinta gobolka, ka dibna wuxuu u gudbiyaa Wasaaradda isagoo raacinaya warbixin faah-faahsan.
4. Wuxuu aruriyaa isuna duwaa xisaab-xirada Miisaaniyadda dawladaha hoose ee gobolkiisa, wuxuna u soo gudbiyaa Wasaaradda.
5. Wuxuu mas'uul ka yahay isu-duwidda maamulka iyo dhaqaalaha xarunta gobolka, wuxuna u-xil-saaran yahay bixinta mushaharooyinka xarunta.
6. Wuxuu kaydiyaa dukumentiyada xarunta gobolka iyo faylasha shaqaalaha dawladaha hoose ee degmooyinka gobolka.

## CUTUBKA 3-aad
## UNKIDDA MAAMULKA D/HOOSE

## Qodobka 16-aad
## Habka Maamulka D/hoose

1. Dhismaha D/hoose waa qayb ka mid ah tan maamulka dhexe ee dowladda, iyadoo ay siyaasad ahaan mas'uul uga tahay Wasaaraddu.
2. Maamulka D/hoose wuxuu ku dhisan yahay habka maamul baahinta sida ku cad qodobka 120-aad ee dastuurka dawladda Puntland.
3. Maamulka dawladaha hoose wuxuu ka kooban yahay;-

   b. Degmo.

   t. Degsiimo.

   j. Tuulo.

4. D/hoose waa hay'ad dowladeed oo loo aasaasay horumarinta maamulka degmooyinka, waxayna leedahay jiritaan qaanuuni ah iyo maamul madax bannaan oo ay ku fuliso waajibaadkeeda si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 17-aad
## Shuruudaha Degmo Lagu Bixin Karo

1. Waa in degmada cusub ay u jirtaa degmada kale masaafo aan ka yarayn afartan (40) kilo mitir.
2. Waa in qiyaasta dadweynaha degmadu aanay ka yarayn afar kun oo qoys (4,000).
3. Waa in degmadu dhaqaale ahaan dabooli kartaa baahideeda dhaqaale 50%.
4. Waa inay hoos tagaan ugu yaraan laba (2) degsiimo iyo Shan (5 ) tuulo.
5. Waa inay leedahay jidad, huteelo, isgaarsiin iyo adeegyada asaasiga ah sida xarun caafimaad iyo dugsi hoose/dhexe.

## Qodobka 18-aad
## Shuruudaha Degsiimo Lagu Aqoonsan Karo

1. Waa in degsiimadu ay u jirtaa degmada masaafo aan ka yarayn labaatan (20) kilo mitir.
2. Waa in dadweynaha degsiimada aanay ka yarayn kun (1,000) qoys.
3. Waa inay degsiimadu leedahay ilo dhaqaale oo canshuur bixiyayaal ah.
4. Waa inay leedahay adeegyada asaasiga ah qaarkood.

## Qodobka 19-aad
## Shuruudaha Tuulo Lagu Aqoonsan Karo

1. Waa in Tuuladu ay u jirtaa degmada masaafo aan ka yarayn toban (10) kilo mitir.
2. Waa in dadweynaha tuulada aanay ka yarayn boqol (100) qoys.

## Qodobka 20-aad
## Derejooyinka Degmooyinka

1. Degmooyinku waxay u qaybsamaan derejooyinka A, B, iyo C.
2. Haddii degmo loo aqoonsado in ay la timid horumar xagga dhaqaalaha ama bulshada la xiriira, waxay Wasaaraddu talo ku soo jeedinaysaa in wax laga bedelo darajada degmada, waxaana laga ansixinayaa isbedelkaas Golaha Wakiillada.

3. Haddii degmo hoos uga dhacdo shuruudihii markii hore darajada lagu siiyay, waxay Wasaaraddu iyadoo daraasad ku salaynaysa ay talo ku soo jeedinaysaa in darajo ahaan degmadaas hoos loo dhigo, waxaana laga ansixinayaa Golaha Wakiillada.

## Qodobka 21-aad
## Soohdimaha Degmooyinka

1. Degmooyinkii hore u jiray ee aysan saameyn xuduudaheeda magacaabidda degmooyinka cusubi, waxay yeelanayaan xuduudahoodii, magaalo madaxyadoodii iyo magacoodii.
2. Xuduudaha gobollada iyo degmooyinka cusub iyo kuwa ay ka farcameen waxaa lagu soo saarayaa wareegto Madaxweyne, iyadoo la tix-gelinayo talada Wasaaradda ee ku dhisan daraasad, ka dibna waxaa laga ansixinayaa Golaha Wakiillada.
3. Derejooyinka degmooyinka, waxaa lagu salaynayaa baaxadda deegaankooda, wax-soosaar-kooda iyo tirada dadka ku nool.

# CUTUBKA 4-aad
# QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA D/HOOSE
## Qodobka 22-aad
## Doorashada, Xil-haynta iyo Dhaarta Golayaasha Deegaanka

1. Golayaasha Deegaanka waxaa dooranaya muwaadiniinta degmo kasta, si waafaqsan qodobka 123-aad farqadiisa 3-aad ee dastuurka dawladda Puntland iyo Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka
2. Muddada xil-haynta goluhu waxay noqoneysaa shan (5) sano oo ka bilaabata maalinta natiijada doorashada lagu dhawaaqo, dibna waa loo soo dooran karaa.
3. Xubnaha golaha deegaanka ee la soo doortay waxay marayaan dhaarta dastuuriga ah, si waafaqsan qodobka 132-aad ee dastuurka.

## Qodobka 23-aad
## Shuruudaha Doorashada Xubnaha Golaha Deegaanka

Qofka loo dooranayo inuu xubin ka noqdo Golaha Deegaanka waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:

1. Muwaadin kasta oo Muslim ah, guta waajibaadka diiniga ah, xil-kas ah, garaadkiisu dhan yahay, Puntlander ah, da'diisuna aanay ka yarayn Labaatan iyo shan (25) sano waa loo dooran karaa inuu xubin ka noqdo golayaasha deegaanka Puntland, sida ku cad qodobka 126-aad ee dastuurka dawladda Puntland.
2. Waa inuu leeyahay aqoon dugsi dhexe ama wax u dhigma.
3. Waa inaan xuquuqdiisa muwaadinnimo la laalin Shantii (5) sano ee ugu dambeysey.
4. Waa in aanu ahayn shaqaale dawladeed.
5. Waa inuu aqoon u leeyahay saldhigga iyo seynsaabka bulshada deegaankiisa.
6. Waa inuu leeyahay akhlaaq wanaagsan iyo dad la dhaqan.

## Qodobka 24-aad
## Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Golaha Deegaanka

1. Xubinnimada Golaha Deegaanka waxaa lagu waayi karaa;-
   b. Xubinta oo geeriyoota.
   t. Xubinta oo istiqaalad golaha keenta, lagana oggolaado.
   j. Xubinta oo xukun kama dambays ah maxkamad awood u lihi ku xukunto taas oo uu ku mutaysto ciqaab.
   x. Xubinta oo ka maqnaata labo kalfadhi oo caadi ah oo isku xiga iyada oo aanay jirin sabab maangal ah.
   kh. Xubinta oo ka qayb-gasha falal lid ku ah Shareecada Islaamka, khiyaamo qaran, ku xad-gudub Dastuurka iyo xeerka kale ee Dalka.
   D. Xubinta oo isaga baxda Xisbigii ay ka tirsanayd sida ku cad Qodobka 46.6-aad ee Dastuurka Dawladda Puntland.
2. Haddii xubin ka mid ah golaha deegaanka lumiso xubinnimadeeda, sharciga doorashada ayaa caddaynaya habraaca loo marayo doorashada xubinta cusub, waana in lagu dhaariyo soddon (30) beri gudohood laga bilaabo maalinta xubinta uu beddelayaa lumisay xubinnimada golaha.

## Qodobka 25-aad
## Xasaanadda Golaha Deegaanka

1. Xubin kasta oo ka mid ah golaha deegaanka lama xiri karo, lamana baari karo jirkiisa, deegaankiisa iyo gaadiidka uu markaas wato, haddii aan golaha deegaanku oggolaan codsi xasaanad ka qaadis ah oo uu soo gudbiyey xafiiska xeer-ilaalinta guud ama aan lagu qaban isagoo faraha kula jira fal-dembiyeed culus, sida uu qabo qodobka 131-aad farqadiisa 7-aad ee dastuurku.
2. Haddii ay caddaato in xubinta lagu qabto asagoo fal-dembiyeed gacanta kula jira waa in si degdeg ah loo gaarsiiyaa guddoonka golaha si xasaanadda looga qaado.
3. Xubinta lagu helo denbi si looga qaado xasaanadda waxaa la marayaa sida sharcigu qabo.
4. Xasaanadda xubintu waxay ku eg tahay inta uu xilka hayo.

## Qodobka 26-aad
## Tirada Golayaasha Deegaanka

1. Tirada golayaasha deegaanka waxaa lagu salaynayaa hadba darajada degmada (A, B iyo C ).
   b. Degmooyinka derajada "A" waxay yeelanayaan gole degaaneed oo ka kooban 33-xubnood.
   t. Degmooyinka derajada "B" waxay yeelanayaan gole degaaneed oo ka kooban 27-xubnood.
   j. Degmooyinka derajada "C" waxay yeelanayaan gole deegaaneed oo ka kooban 21-xubnood.
2. Golaha deegaanka waa inay ka muuqdaan dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada deegaanka, gaar ahaan haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay. .

## Qodobka 27-aad
## Kala-Dirista Golayaasha Deegaanka

1) Golaha deegaanka waxaa la kala diri karaa marka ay dhacaan arrimaha soo socda mid ka mid ah ama dhammaantood:
   b. Marka ay is-casilaan 2/3 xubnaha golaha deegaanka.
   t. Marka goluhu fariisan waayo laba kal-fadhi oo isku xiga sabab la'aan.
   j. Marka dadweynihii soo doortay ee degmooyinka darajada "A" Saddex kun( 3000), darajada "B" laba kun ( 2000) , darajada "C" kun iyo shan boqol ( 1500) oo qof ay Maxkamadda degmada iska diiwaan galiyaan kuna hor saxiixaan, soona jeediyaan in la kala diro golaha.
   x. Mar kasta oo ay sugnaato in goluhu si bareer ah ugu xad-gudbey shareecada Islaamka, dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.
2) Haddii ay wada dhacaan ama mid ka mid ah dhaco arrimaha ku xusan faqrada 1-aad xarfaha (b, t, j iyo x) ee qodobkan, waxay Wasaaraddu samaynaysaa baaritaan ku saabsan eedaymaha, waxayna gun-gaarka baaritaanka u gudbinaysaa Madaxweynaha.
3) Madaxweynuhu marka uu helo sugnaanshaha iney dheceen mid ka mid ah ama dhammaantood arrimaha ku xusan farqada 1-aad xarfaha b, t, j iyo x ee qodobkan, wuxuu maxkamadda dastuuriga ah u gudbinayaa qoraal uu ku dalbanayo sugnaanshaha arrimaha ku xusan farqada 1-aad.
4) Markii ay u caddaato maxkamadda dastuuriga ah gelidda arrimaha ku xusan farqada 1-aad xarfaha b, t, j iyo x ee qodobkan, waxay Madaxweynaha u gudbineysaa iney sugnaatay eedaynta lagu soo oogey golaha deegaanka.
5) Madaxweynuhu marka uu helo caddaynta maxkamadda dastuuriga ah, wuxuu soo saarayaa go'aanka kala dirista golaha deegaanka, isagoo isla qoraalkaasna ku caddaynaya in lagu soo doorto golaha deegaanka ee cusub muddo afartan iyo shan (45)-casho gudahood ah.

6) Inta gole cusub laga soo dooranayo, waxaa xilka sii haynaya guddoomiye ku-meel-gaar ah oo ay iska soo xulaan xisbiga aqlabiyadda golaha deegaanka, wuxuuna fulinayaa qorshayaashii hore, mase abuuri karo qorshe cusub.

## Qodobka 28-aad
## Awoodaha Golaha Deegaanka

Golaha deegaanku waxa uu leeyahay awoodaha soo socda:-

1. Waxay la xisaabtamaan guddiga fulinta ee D/hoose.
2. Waxay xaqiijiyaan ururinta canshuuraha, qaraamaadka iyo wixii xuquuq kale ah oo xeerka ama qawaaniinta kale ay siinayaan D/hoose iyo dakhli kasta oo ka yimaada hawlaha ay qabato D/hoose.
3. Waxay talo ku soo jeediyaan la wareegidda hanti dad kale leeyahay dan guud awgeed, iyadoo la bixinaayo magdhaw u dhigma hantidaas sida uu qabo qodobka 53-aad ee dastuurka DPL.
4. Waxay xilka ka qaadi karaan guddoomiyaha golaha deegaanka ahna duqa degmada iyo ku xigeenkiisa markii ay gudan waayaan waajibaadkii loo xilsaaray.
5. Waxay kala diri karaan maamulka degsiimada, xaafadaha iyo tuulooyinka marka ay caddaato inay ka bayreen ujeeddooyinkii loo abuuray ama ka tarjumiwaayaan danaha dadka deegaanka.
6. Wuxuu ka qayb-qaataa fulinta qorsheyaasha dowladda ee heer degmo oo ku wajahan adeegyada bulshada sida: waxbarashada aasaasiga ah, caafimaadka, xannaanada xoolaha, beeraha, nabadgelyada, biyaha, korontada, isgaarsiinta, ilaalinta deegaanka, dhiiri-gelinta ka faa'iidaysiga khayraadka badda, ka shaqaynta nadaafadda, horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo guud ahaan mashaariicda horumarineed ee heer degmo.
7. Waxay go'aamiyaan wax-ka-bedelidda iyo joojinta khidmadaha laga qaado dadweynaha ee la xiriira adeegyada uu fuliyo golaha deegaanku iyo jaangoynta tabarucaadyo gaar ah oo laga rabo dadweynaha, laguna maalgeliyo mashaariicda danta guud ee laga fulinayo deegaanka.

8. Waxay ansixiyaan shaqaalaha qaybta dabagalka iyo guddiyada gaarka ah, waxayna amri karaan shaqaale dhimis iyo shaqaale kordhin.
9. Waxay ansixiyaan Miisaaniyad sannadeedka degmada oo ah filasho dakhli iyo kharash isu dheelitiran.
10. Waxay dejiyaan xeer-hoosaadyo iyo awaamiir lagu fulinayo hawlaha uu xeerkani siinayo D/hoose.
11. Waxay magacaabi karaan guddiyo gaar ah oo kala shaqeeya hawla gaar ah oo ka mid ah hawlaha xeerkani siinayo golaha.
12. Waxay soo jeediyaan oo ansixiyaan wax-ka-bedelka canshuuraha iyagoo raacaya hab raacyada Wasaaradda, siinayana Wasaaradda ogeysiis.
13. Waxay dejiyaan oo ansixiyaan qorshaha horumarinta degmada kaas oo hirgelintiisa ay kala kaashanayaan maamulka dhexe ee dawladda Puntland.
14. Waxay maamulaan hantida iyo dakhli kasta oo gacantooda soo gala, waxayna xisaab-celin tifaftiran u gudbiyaan Wasaaradda iyo Hanti-dhawrka guud.
15. Waxay xiriir iskaashi iyo wax wada qabsi la yeelan karaan magaalooyinka iyo golayaasha dhigooda ah ee heer caalami iyo kuwa gudaha, waxayna ogeysiin siinayaan Wasaaradda.
16. Waxay qabtaan kulan sannadeed lagu dhegeysto Miisaaniyadda oo ay ka soo qayb galayaan qeybaha kala duwan ee bulshada deegaanka.
17. Diyaarinta canshuuraha degmada loona gudbiyo Wasaaradda ku shaqada leh si looga ansixiyo Golaha Wakiillada.
18. Gacan ka geysashada mashaariicda horumarineed ee ay degmada ka fulinayaan hay'adaha dawladda ee heer qaran, Puntland iyo gobol.
19. Waxay adeegsadaan guud ahaan awoodaha uu siinayo dastuurku iyo xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 29-aad

## Doorashada Guddoomiyaha/Duqa Degmada iyo Ku-Xigeenkiisa

1. Xisbiga ku guulaysta aqlabiyada tirada xubnaha golaha deegaanka ee degmada, waxa uu soo xulayaa guddoomiyaha/duqa iyo G/ku xigeenka golaha, loomana baahna in doorasho la galo.
2. Haddii xisbina ku guuleysan waayo tirada xubno ku filan inuu soo dhiso guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa sida ku xusan farqada 1-aad, waxay samayn karaan xisbiyada isbahaysi si ay u helaan aqlabiyad ay ku soo dhisaan guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa.
3. Haddii la waayo arrimaha ku xusan faqradaha 1-aad iyo 2-aad, guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa uu ku imanayaa tartan doorasho oo xunbaha goluhu dooranayaan si xor iyo xalaal ah, iyadoo la raacayo habraaca ku xusan farqadaha 5-aad ilaaa 11-aad ee qodobkan.
4. Xubnaha u tartamaya guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa, waxaa soo sharraxaya xisbiga ay ka soo baxeen, mana jiri karo musharrax iskiis ah oo aan xisbigiisu soo sharrixin.
5. Fadhiga ugu horeeya ee golaha deegaanka inta laga dooranayo guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa, waxaa si ku-meel-gaar ah u sii guddoominaya xubinta ugu da'da weyn xubnaha golaha deegaanka.
6. Gudoomiyaha ku-meel-gaarka ah ee ku xusan farqada 5-aad ee qodobkan ayaa golaha ka dhex qabanayaa guddi doorasho oo aan ka badnayn todoba (7) xubnood, kana yarayn saddex (3) xubnood.
7. Haddii qofka ugu da'da weyn u tartamayo jagada guddoomiyaha ama ku xigeenkiisa markaas waxaa guddoomiya xubinta da'a ahaan ku xigta ee golaha deegaanka.
8. Guddoomiyaha iyo ku-xigeekiisa waxaa cod gacan taag ama qarsoodi ah ku dooranaya xubnaha golaha deegaanka.
9. Murashaxiinta u tartamaysa xilka gudoomiyaha/duqa iyo ku xigeenkiisa, waa inay yihiin xubno ka tirsan golaha deegaanka.
10. Murashax kasta waa inuu soo gudbiyaa qoraal muujinaaya inuu xisbigiisu soo sharraxay oo ay la socdaan labo sawir iyo taariikh nololeedkiisa/nololeedkeeda.
11. Codayntu waxay noqonaysaa ilaa saddex (3) wareeg:
    b. Wareegga koowaad murashaxii hela codadka aqlabiyadda tirada guud ee xubnaha golaha deegaanka ayaa ku guuleysanaya doorashada.

t. Haddii la waayo murashax hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareegga labaad.

j. Wareegga labaad waxaa ka qeyb galaya saddexda (3) murashax ee hela tirada codadka ugu badan ee wareegga koowaad.

x. Haddii ay jiraan murashaxiin helay cod is le'eg oo barbar-dhac ah, waa ka wada qayb galayaan doorashada wareegga labaad, oo tirada tartamayaasha ayaa kordhaysa. Iyadoo Murashaxii hela codadka aqlabiyadda tirada ee xubnaha golaha deegaanka uu ku guuleysanayo doorashada. Haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareegga saddexaad.

kh. Wareegga saddexaad waxaa ka qeyb-galaya labada (2) murashax ee ugu codadka badan wareegga labaad. Haddii uu jiro murashax seddexaad oo heley tiro la siman mid ka mid ah labada murashax ee isku soo haray, wuxuu isaguna ka qeyb galayaa wareegga saddexaad, waxaana doorashada ku guulaysanaya murashaxii hela cod hal-dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyey.

d. Haddii ay dhacdo in wareegga 1-aad ka dib ay isku soo haraan labo murashax oo kaliya, sababtuna ay tahay tanaasul ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiinta kale, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareegga seddexaad, waxaana markaa meesha ka baxay wereeggii labaad.

r. Labada murashax ee isku soo haray waxay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyey.

12. Markey codeyntu dhammaato wuxuu guddoomiyaha ku-meel-gaarka ah furayaa sanaadiiqda codeynta, waxaana la tirinayaa codadka, ka dibna waxaa guddoomiyuhu ku dhawaaqayaa natiijada doorashada ciddii ku guuleysatay jagada guddoomiyaha golaha deegaanka/duqa degmada iyo ku-xigeenkiisa.

## Qodobka 30-aad

## Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka / Duqa degmada

1. Guddoomiyaha golaha deegaanka / duqa degmada waa madaxa laamaha dawladda ee degmada, wuxuuna guddoomiyaa guddiyada horumarinta iyo nabadgelyada degmada.
2. Wuxuu kormeeraa dhammaan shaqada dawladda ee degmada.

3. Wuxuu shir-guddoomiyaa kulamada ay isugu yimaadaan golaha deegaanka, maamulka degsiimooyinka, guddiyada tuulooyinka iyo xaafadaha.
4. Waa madaxa fulinta ee dawladda hoose, wuxuuna isku-xiraa maamulka degmada iyo dawladda dhexe ee Puntland.
5. Wuxuu u-xil-saaran yahay fulinta go'aanada golaha deegaanka iyo hawl maalmeedka maamulka degmada.
6. Wuxuu golaha isugu yeeri karaa kalfadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn waxa kale oo uu isugu yeeri karaa marka ay soo jeediyaan saddex meelood oo meel (1/3) tirada guud ee xubnaha golaha deegaanka.
7. Wuxuu leeyahay saxiixa go'aamada rasmiga ah ee ka soo baxa golaha deegaanka iyo kuwa guddiga Joogtada ah.
8. Wuxuu golaha hor-dhigayaa si looga doodo, dabadeena loo oggalaado xubnaha guddiga joogtada ah, oo aanay xubnihiisu ka badnaan karin saddex meelood oo meel (1/3) tirada guud ee xubnaha golaha deegaanka .
9. Diyaarinta Miinsaaniyadda iyo qorshaha D/Hoose.

## Qodobka 31-aad

## Awoodda iyo Waajibaadka Ku-Xigeenka Gudoomiyaha Golaha Deegaanka

1. Ku-xigeenka guddoomiyaha ahna ku-xigeenka duqa degmadu waxa uu qabanayaa dhammaan xilka duqa degmadu qaban jiray marka uu maqan yahay ama uu si ku-meel-gaar ah xilkiisa u gudan kari waayo, is casilo ama bukoodo.
2. Ma bannaana inuu duqu ku wareejiyo qaybo ka mid ah xilkiisa iyo awoodihiisa cid kale oo aan ahayn ku-xigeenkiisa, markay xaaladaha ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan timaado.
3. Waxa uu kala taliyaa guddoomiyaha/duqa dhammaan hawlaha dawladda hoose.
4. Fulinta hawlaha uu guddoomiyuhu u wakiisho ee aan ka baxsanayn xilka iyo waajibaadka guddoomiyaha.

## Qodobka 32-aad
## Xil-Waayista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka Ahna Duqa Degmada iyo Ku- Xigeenkiisa

1. Guddoomiyaha golaha deegaanka ahna duqa degmada iyo ku-xigeenkiisu waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda;
   b. Geeri
   t. Istiqaalad qoraal ah goluhuna ka aqbalo.
   j. Xil gudasho la'aan sabab kasta ha ku timaadee.
   x. Ku xad-gudub Shareecada Iaslaamka, dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka.
   kh. Mar walba oo ay muddada xil-hayntu ka dhammaato.
   d. Lunsasho hanti dadweyne.
   r. Xukun kama dambays ah oo ay ku ridey Maxkamad awood u lihi oo uu ku mutaystay ciqaab.
   s. Lumiyso Xubinimada Golaha Deegaanka sida ku cad Qodobka 24-aad ee Xeerkan
2. Marka ay dhacaan arrimaha ku xusan xarfaha j, x, d iyo r ee farqada 1$^{-aad}$ ee qodobkan sabab kasta ha ku timaadee, ayna soo jeediyaan saddex meelood oo meel (1/3) tirada xubnaha golaha deegaanka, waxaa xilka lagaga qaadi karaa saddex meelood laba meelood (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha deegaanka.
3. Haddii ay dhacdo sabab kasta ha ku timaadee xil-waayista ku xusan qodobkan, waxaa guddoomiyaha cusub ahna duqa degmada lagu soo dooranayaa muddo dhan soddon (30) maalmood gudohood, iyadoo loo raacayo Qodobka 29-aad ee Xeerkan waxaana xilka sii haynaya ku-xigeenkiisa. Haddii xil-ka- qaadistu wada saamayso guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa waxaa xilka sii haynaya xubinta golaha ugu da'ada weyn.

## Qodobka 33-aad
## Guddiga Fulinta Golaha Deegaanka

Guddiga fulinta ee degmadu waxa uu ka kooban yahay;-

b. Guddoomiyaha golaha deegaanka ahna duqa degmada.

t. Ku-xigeenka duqa degmada.

j. Xoghayaha D/hoose.

## Qodobka 34-aad
## Waajibaadka Guddiga Fulinta

Guddiga fulinta degmadu wuxuu u-xil-saaran yahay:-

1. Fulinta hawl-maalmeedka maamulka degmada.
2. Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha degmada.
3. Fulinta meel-marinta iyo dhaqan gelinta go'aanada golaha deegaanka ee degmada.
4. Fulinta shuruucda, xeerarka, go'aamada iyo amarada ka soo fula guddiga joogtada ah ee golaha deegaanka degmada iyo xukuumadda.
5. Diyaarinta fulinta iyo ku dhaqanka Miisaaniyadda.
6. Dhaqan-gelinta meel-marinta iyo kormeerka mashaariicda horumarineed.
7. Diyaarin warbixino fulineed ee hawlaha qabsoomay kalfadhiyada dhexdooda, wixii aan qabsoomin iyo u soo bandhigidooda guddiga joogatada ah.
8. U soo bandhigidda guddiga joogtada ah amarada deg-dega ah ee ka soo baxa xukuumadda ee aan sugi karayn kalfadhiga golaha.
9. Isticmaalka kharashyada si waafaqsan Miisaaniyadda D/hoose.
10. Haynta, bixinta dhul iyo hanti kale dan guud awgeed ka dib markuu oggolaansho ka helo guddiga joogtada ah.
11. Soo jeedinta canshuur dejinta, kordhinta, dhimista, qiimaynta iyo khidmad saaridda shatiyada iyo adeegyada kale.
12. Waxay heshiisyo la gali karaan cid kasta oo dani dhex-mari karto wixii heer degmo ah.
13. Waxay la xiriiri karaan macaamilna la yeelan karaan Shirkad, qof iyo wixii ka badan ee khuseeya xilkooda.
14. Waxay matali karaan cid kasta iyo hawl kasta oo qayb ay ka tahay D/Hoose.
15. Waxay bixin karaan shaqaale, qalab, adeeg iyo hoy mar kasta oo baahi timaado dan guud awgeed.

## Qodobka 35-aad
## Qabsoomid La'aanta Doorashada Golayaasha Deegaanka

Haddii aysan ka qabsoomin doorashada golayaasha deegaanka degmo ka mid ah Degmooyinka Puntland, waxay yeelanaysaa maamul ku meel gaar ah, iyadoo la sababaynayo duruufaha keentay inay ka dhiciweydo doorashada Golaha Deegaanku.

## Qodobka 36-aad
## Magacaabista iyo Xil-Ka-Qaadista Xoghayaha D/hoose

1. Dowlad hoose oo kasta waxay yeelanaysaa xoghaye dawladda hoose oo uu magacaabayo Wasiirka Wasaaraddu.
2. Xil-ka-qaadista xoghayaha D/hoose waxaa leh Wasiirka Wasaaradda ka dib marka uu helo go'aanka guddiga joogtada ah ee golaha deegaanka, kuwaas oo marka hore digniin kama dambays ah siinaya. Digniintaas ka dibna marka ay go'aankooda u gudbiyaan Wasiirka ay waajib ku tahay Wasiirka Wasaaradda inuu muddo labaatan iyo kow (21) maalmood gudohood ah ku soo dhammaystiro magacaabista xoghayaha cusub.
3. Haddii ay dhacdo xil-ka-qaadista ku xusan farqada $2^{-aad}$ ee qodobkan muddada la soo magacaabayo xoghayaha cusub waxaa hawsha si ku-meel-gaar ah u sii wadaya agaasimaha waaxda maamulka D/hoose ee degmada.

## Qodobka 37-aad
## Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha D/hoose

1. Xoghayaha iyo shaqaalaha D/hoose waxay hoos imaanayaan duqa degmada.
2. Xoghayaha iyo shaqaalaha kale waxa ay mas'uul ka yihiin fulinta awaamiirta uu siiyo duqa degmada ee waafaqsan xeerkan iyo qawaaniinta kale ee dalka.
3. Waa maamulaha lacagta D/hoose ee degmada.
4. Wuxuu madax u yahay shaqaalaha dowladda hoose.
5. Wuxuu mas'uul ka yahay kharashka iyo dakhliga dowladda hoose,waxaana uu ilaaliyaa habsami u socodka hawl maalmeedka iyo habka adeegga D/hoose.
6. Wuxuu mas'uul ka yahay shaqo fulinta shaqaalaha iyo xuquuqda shaqaalaha.

## Qodobka 38-aad
## Shuruudaha Lagu Xulanayo Xoghayaha D/hoose

Qofka loo magacaabayo Xoghayaha D/hoose waa inuu buuxiyaa shuruudaha hoos ku xusan:-

1. Waa inuu leeyahay waxbarasho jaamacadeed oo xiriir la leh shaqadiisa.
2. Waa inuu leeyahay ugu yaraan shan (5) sano oo waaya aragnimo la xiriirta maamulka iyo maaraynta.
3. Waa inuu yahay shakhsi hufan, aan balwad lahayn, bulshadana ku dhex leh sumcad wanaagsan.
4. waa inuu aqoon buuxda u leeyahay deegaanka uu ka shaqaynayo.

## Qodobka 39-aad
## Guddiga Joogtada Ah

Guddiga joogtada ahi:-

1. Wuxuu fulinayaa hawlaha golaha deegaanka muddada u dhexaysa labada kalfadhi.
2. Wuxuu u bandhigayaa hawlaha uu qabto golaha deegaanka si loo ansixiyo.
3. Wuxuu leeyahay soo jeedinta dhismaha guddiyadda Degsiimooyinka, Xaafadaha iyo Tuulooyinka.

## Qodobka 40-aad
## Kulamada iyo Go'aamada Guddiga Joogtada Ah

1) Guddiga Joogtada ahi waxay yeelanayaan fadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
2) Guddiga joogtada ahi waxay kulmayaan bishiiba mar ugu yaraan ama todobaadkiiba mar.
3) Fadhiyada guddiga joogtada ah waxay ku ansaxayaan marka ay joogaan saddex-meelood laba meelood (2/3) tirada xubnaha guddiga joogtada ah.

4) Dhammaan go'aamada guddigu waxay ku meel-marayaan cod hal-dheeri ah, haddiise natiijada cod-bixintu ay laba jeer is le'ekaato waxaa mar saddexaadka cod dheeri ah yeelanaya guddoomiyaha guddiga.

## Qodobka 41-aad
## Guddiga Maamulka Xaafadaha

1. Guddiga Maamulka xaafadaha waxay ka kooban yihiin todoba (7) xubnood mana leh awood is-maamul sida golaha heer degmo.
2. Guddiga xaafaddu waxay u-xil-saaran yihiin arrimaha soo socda;-
   b. Isku xirka golaha deegaanka degmada iyo dadweynaha xaafadda.
   t. Xaqiijinta in adeegyada loo baahan yahay ay gaaraan xaafadda.
   j. Fulinta go'aamada, qoryashaasha iyo shuruucda kasoo baxa maamulka degmada.
   x. Ka qeyb qaadashada kobcinta dakhliga degmada iyo hawlaha iskaa-wax-u-qabso.
   kh. Xoojinta amniga iyo deganaanshaha xaafadda.
   d. Waxay ka qayb qaataan wixii kale ee hawlo ah ee maamulka degmadu u igmado.
3. Guddiga maamulka xaafaddu waxay yeelanayaan guddoomiye, ku-xigeen iyo xoghayn, waxaana xeer-hoosaad ay isku maamulaan soo saaraya golaha deegaanka degmada.

## Qodobka 42-aad
## Maamulka Degsiimada iyo Guddiyada Tuulooyinka

1. Maamulka degsiimada iyo guddiyada tuulooyinka waxaa iska soo dhex dooranaya bulshada degaamada degsiimada iyo tuulada.
2. Dadweynaha sida joogtada ah u degan degsiimada waxay labadii sano mar iska soo dooranayaan maamulka degsiimadooda oo ka kooban toban iyo kow (11) xubnood, waxaana ansixiya golaha deegaanka ee degmada.

3. Dadweynaha tuulada waxay yeelanayaan guddi maamul oo kala mid ah habka iska soo dhex doorashada, mudda-xileedka iyo magacaabista guddiga maamulka degsiimada, waxayna ka kooban yihiin todoba (7) xubnood.
4. Guddiyada maamul ee heer Degsiimo iyo Tuulo waxay iska dhex dooranayaan guddoomiye iyo ku-xigeen, waxaana xeer-hoosaad ay isku maamulaan soo saaraya golaha deegaanka.

## Qodobka 43-aad
## Awoodaha Guddiga Maamulka Degsiimada iyo Tuulada

1. Guddiyada degsiimada iyo tuulada malaha awood is-maamul sida golaha deegaanka degmada.
2. Guddiyada degsiimada iyo tuuladu waxay:
   b. fuliyaan go'aamada, qoryashaasha iyo shuruucda kasoo baxa golaha deegaanka heer degmo.
   t. Waxay ururiyaan, una gudbiyaan waaxda qorshaynta degmada baahiyaha gaarka ah ee deegaanka ay matalaan.
   j. Waxay fuliyaan hawlaha ay u igmato D/hoose iyo dawladda dhexe.
   x. Waxay xalliyaan khilaafaadka ka dhex jira dadweynaha deegaankaas.
   kh. Waxay ka qayb qaataan sugidda amniga.
   d. Waxay ka hortagaan nabaad-guurka iyo xaalufka deegaanka.
   r. Waxay ka qayb qaataan mashaariicda iskaa-wax-u-qabso iyo abaabulka dakhliga.
   s. Waxay kale oo qabtaan wixii kale ee hawlo ah ee maamulka degmadu u igmado.

## Qodobka 44-aad
## Shirarka Golaha Deegaanka

1. Kalfadhiga ugu horeeya ee golaha deegaanka waxaa la qabanayaa soddon (30) maalmood gudahooda, ka dib marka ay ku dhawaaqdo Maxkamada Sare Natiijada kama dambaysta ah ee doorashada xubnaha golaha deegaanka.
2. Shirarka kale ee golaha deegaanka waxaa isugu yeeraya guddoomiyaha golaha deegaanka ahna duqa degmada ama waxaa soo jeedinaya saddex meelood oo meel (1/3) tirada guud ee xubnaha golaha deegaanka.

3. Golaha deegaanka waxa uu kulmayaa lixdii biloodba mar, guddiga joogtada ahina waxa uu kulmayaa bishiiba mar ugu yaraan ama todobaadkiiba mar.
4. Golaha deegaanka wuxuu isugu imaan karaa kal-fadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
5. Shirarka golayaasha deegaanka waxay u furan yihiin dadweynaha inay dhegeystaan haddii aanu ahayn shir albaabadu u xiran yihiin.

## Qodobka 45-aad
## Ansaxa Shirarka Golaha Deegaanka

1. Fadhiyada golaha deegaanku waxay ku furmayaan kala bar iyo hal (1/2+1) tirada guud ee xubnaha golaha.
2. Go'amada goluhu waxay ku meel-marayaan cod hal dheeri ah, haddiise natiijada cod-bixintu ay laba jeer is le'ekaato waxaa mar saddexaadka cod dheeri ah yeelanaya guddoomiyaha.

## Qodobka 46-aad
## Hadal Qoraalka iyo Diiwaan Gelinta

1. Dhammaan shirarka golaha deegaanka iyo guddiyada kale waa in dooddooda lagu sameeyo hadal-qoraal (Minutes).
2. Hadal qoraalka golaha deegaanka waa in la diiwaangeliyaa, lana kaydiyaa iyadoo uu mas'uul ka noqonayo xoghaynta golaha deegaanka.
3. Hadal qoraalka golaha deegaanka iyo kan guddiga joogatada ah waxaa qaadaya xoghaynta golaha deegaanka wuxuuna xaq u leeyahay inuu ra'yigiisa ka dhiibto shirarka hase yeeshee cod kuma laha.
4. Xoghaynta golaha deegaanka waxaa magacaabaya guddoomiyaha golaha deegaanka marka uu la tashado guddoomiye ku-xigeenka.

## Qodobka 47-aad
## Mushaharka iyo Gunnooyinka Golayaasha Deegaanka

1. Guddoomiyaha golaha deegaanka iyo ku-xigeenkiisu waxay leeyihiin mushahar bileed iyo gunno xil uu goluhu u xaddido una ansixiyo.
2. Guddiga joogtada ah oo aaney ku jirin xubnaha guddiga fulintu waxay yeelanayaan gunno bileed iyo gunno kalfadhi oo goluhu u xaddido una ansixiyo.
3. Xubnaha kale ee goluhu waxay yeelanayaan gunno kal-fadhi oo goluhu u jaangooyo.
4. Guddi hoosaadyadu waxay yeelanayaan gunno fadhi oo goluhu u xaddido una ansixiyo.
5. Guddiyada golaha deegaanku marka ay u baxayaan safar shaqo waxa ay yeelanayaan sahay safar oo goluhu u jaangooyo.
6. Gunnooyinka ku tilmaaman faqradaha $1^{-aad}$,$2^{-aad}$, $3^{-aad}$, $4^{-aad}$ iyo $5^{-aad}$ ee qodobkan waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda D/hoose ee degmada.

## Qodobka 48-aad
## Guddiga Nabadgelyada Degmada

1. Sida uu qabo Xeerka Nabadgelyada Guud ee Puntland ( Xeer Lr.1 ee 2000) , guddiga nabadgelyada degmadu wuxuu ka kooban yahay:-
   b. Guddoomiyaha degmada ahna duqa degmada iyo ku-xigeenka.
   t. Taliyaha saldhiga dhexe ee degmada.
   j. Madaxa fadhiyada kale ee booliska degmada.
2. Xilka guddiga nabadgelyada degmadu wuxuu noqonayaa:-
   b. Ilaalinta xasiloonida iyo amniga degmada.
   t. Ka hortegidda denbiyada iyo wax ka qabadka denbiyada dhaca.
   j. Wixii kale ee wax u dhimaya amniga iyo nabadgelyada degmada.
   x. Warbixintooda waxay u gudbinayaan Gobolka iyo Wasaaradda.

## CUTUBKA 5-aad
## AWOODAHA MAAMUL IYO XEER-DEJIN EE D/HOOSE
### Qodobka 49-aad
### Waaxyaha Dowladaha Hoose

1. D/hoose waxay yeelanayaan:-

   b. Waaxda Hawlaha Guud.
   t. Waaxda Arrimaha Bulshada.
   j. Waaxda Maaliyadda.
   x. Waaxda Dakhliga.
   Kh. Waaxda Qorshaynta, Kormeerka iyo Dabagalka.
2. Degmadii qaadi karta waaxyo ka badan kuwa qodobkaan ku xusan waxay codsi u diraysaa Wasaaradda si ay u qiimayso codsiga, una oggolaato ama u diido.
3. Degmadii aan qaadi karin waaxyaha kor ku xusan waxay hawlaha waaxyahaasi qabanayaan ku soo uruurin karaan waaxyaha qorshaynta, maaliyadda, hawlaha guud iyo arrimaha bulshada.

### Qodobka 50-aad
### Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Qorshaynta

1) D/hoose waxay mas'uul ka tahay dejinta qorshayaasheeda horumarineed ee waqtiga dhaw iyo waqtiga fog, iyadoo waafajinaysa qorshaha horumarinta guud ee dawladda.
2) Waaxda qorshaynta ee D/hoose ayaa qaabilsan dejinta qorshayaasha iyada oo si dhaw ula shaqaynaysa waaxyaha kale.
3) D/hoose waxay xaqiijinaysaa in qorshayaasheeda waqtiga dhaw iyo waqtiga fog noqdaan kuwa ka tarjuma baahiyaha dhabta ah ee degmada.

### Qodobka 51-aad
### Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Bixinta Adeegyada Bulshada

D/Hoose waxay mas'uul ka tahay:-

1. Dhisidda iyo dayactirka dugsiyada aasaasiga ah, dugsiyada Qur'aanka, xannaanada carruurta, dugsiyada agoonta, naafada iyo Masaajidada.
2. Maamulka caafimaadka aasaasiga ah.
3. D/hoose ee heerka A iyo B waxay mas'uul ka tahay xaqiijinta bixinta adeegyada biyaha iyo korontada oo la wada heli karo, lana wada awoodo.

4. Biyo-dhaaminta xilliyada ay abaaruhu dhacaan.
5. Dhismaha guryo loogu talo galay dadweynaha degmada ee danyarta ah.
6. Dhismaha, dayactirka iyo maamulka xarumaha xannaanada agoomaha iyo dadka garaad-dhimanka ah.
7. Waxay ku abaabulaysaa ganacsatada iyo bulshada bixinta sekada iyo sadaqaadka kale si loogu daryeelo danyarta degmada.

## Qodobka 52-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Nadaafadda iyo Fayo-Dhawrka

D/ Hoose waxay mas'uul ka tahay:-

1. Maaraynta habka bullaacadaha iyo biyo saarka magaalooyinka.
2. Xakamaynta qashinka (adkaha ah iyo kan dareeraha ah) iyo ka hortagga wax kasta oo guud ahaan wax u dhimi kara faya-dhawrka iyo bilicda magaalada, waxayna astaynaysaa goobo dadku ku ururiyaan qashinka.
3. Waxay xaqiijinaysaa habka ugu wanaagsan ee qashinka loo gubi karo, loo aasi karo ama loogu daadin karo goob gaara oo aanay ka dhalan dhibaato caafimaad ama deegaan.
4. Ka hor-tagga iibka cuntada, sharaabka, daawada iyo dhammaan walxaha iyo agabyada kale ee taariikhda isticmaalkooda dhacsan yahay ama la ogaado inay khatar ku yihiin caafimaadka dadka iyo duunyada.
5. Hubinta iyo sugidda caafimaadka xoolaha daabaxa ah ka sokow waxaa D/hoose mas'uul ka tahay u foojignaanta ka hor-tagga cudurada faafa ee ka dhasha nadaafad-darada siiba goobaha gawraca, sariibadaha hilibka, kalluunka iyo qudaarta oo loo baahan yahay joogtaynta nadaafadooda.

## Qodobka 53-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Maamulka Hawlaha Guud

D/hoose waxay mas'uul ka tahay:-

1. Maamulka iyo ilaalinta dhulka danta guud, kan gaarka loo leeyahay iyo xallinta ismaandhaaf kasta oo dhul ka dhasha iyada oo wixii ay xallin waydo u gudbinaysa maxkamadda awoodda u leh.

2. Waxay bixinaysaa dhulka lagu fulinayo hawlaha la xiriira danta guud si waafaqsan naqshadda magaalada.
3. Waxay horumarinaysaa isticmaalka dhulka magaalooyinka iyo ka hortagga dhul habsiga sharci darada ah.
4. Dhismaha waddooyinka dhex-mara degmada iyo nawaaxigeeda ilaa shan (5) kilo mitir oo magaalada ka baxsan.
5. Waxay bixinaysaa ciwaanada, lambarada guryaha, dhulalka iyo waddooyinka.
6. Waxay diiwaangelinaysaa hantida maguurtada ah ee dadweynaha degmada ku nool.
7. Waxay abaabulaysaa oo nidaaminaysaa gaadiidka dadweynaha ee magaalooyinka dhexdooda.
8. Ifinta magaalada, waxayna nalal ka taagaysaa dhammaan waddooyinka iyo goobaha kale ee danta guud.

## Qodobka 54-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Shaqaalaha

1. Shaqaalaha D/hoose waa shaqaale dawladeed, waxaana waajibaadkooda iyo xuquuqdooda lagu nidaaminayaa xeer gaar ah oo ay soo saarto Wasaaraddu.
2. D/hoose iyada ayaa ka mas'uul ah qorista, dallacsiinta iyo ruqsaynta shaqaalaha degmada, waxaana uga mas'uul ah guddiga fulinta si waafaqsan sharciga.
3. Qofka shaqaale ah ee cabasho ka qaba go'aanka guddiga fulinta waxa uu cabashadiisa u gudbin karaa golaha deegaanka, haddii aanu ku qancin go'aanka golaha deegaanka, wuxuu dacwad u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh.

## Qodobka 55-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Diiwaan-Gelinta Dadka

1. D/hoose waxay bixinaysaa oo diiwaangelinaysaa shahaadooyinka guurka, furniinka, dhalashada iyo dhimashada.
2. D/hoose waxay u abuuraysaa mid kasta oo ka mid ah arrimaha ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan diiwaan gaar ah oo lagu kaydiyo.
3. D/hoose waxay bixinaysaa dhalashada iyo sugnaanta (dad dhigis).

4. D/hoose waxay abuuraysaa xafiis gaar ah oo qaabilsan arrimaha la xiriira diiwaangelinta dadka.

## Qodobka 56-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Iibka iyo Qandaraasyada

1. D/hoose waxay u madaxbannaan tahay maamulka iibka iyo qandaraasyada, waxayna yeelanaysaa guddi gaar ah oo u qaabilsan arrimaha iibka iyo qandaraaska kaas oo u xilsaaran;-
   b. Qorshaynta iibka iyo qandaraaska.
   t. Diyaarinta dokumeentiyada iibka iyo qandaraaska.
   j. Xaqiijinta ku dhaqanka habraacyada iyo shuruucda iibka iyo qandaraasyada.
   x. Ilaalinta hufnaanta iyo daah-furnaanta geedi socodka dhammaan heerarka kala duwan ee iibka iyo qandaraas bixinta.
   kh. Furista iyo qiimaynta qandaraasyada iyo siinta qandaraasyada ciddii tartanka ku guulaysata.
2. Heshiisyada ku saabsan gadashada alaabta, qabashada shaqada iyo socodsiinta hawlaha la xiriira maamulka dawladda hoose ama mashaariicda, waxaa oggolaansheheeda leh guddiga fulinta degmada haddii aan xaddiga lacagtu ka badnayn Saddex Boqol oo Malyan (300,000,000 Sh.So), wixii ka badan lacagtaas waxaa leh oggolaanshaheeda golaha deegaanka.
3. Qandaraasyada waa in toban (10) maalmood ka hor loo bandhigaa dadweynaha lana faafiyaa iyadoo qandaraaska lagu dhejinayo meelaha dawladda hoose ugu tala gashay wargelinta iyo meelaha loo garto in ay ku habboon yihiin.
4. Qandaraaska waxaa la siinayaa qofka ugu lacag yar ama ugu farsama fiican oo la hubo lacagta uu sheegtay inay tahay mid macquul ah, oo ku habboon hawsha la qabanayo.
5. Habka iyo hannaanka maamulka iibka iyo qandaraasyada D/hoose waxaa loo raacayaa si waafaqsan habraacyada guud iyo tusmooyinka ku xusan xeerka iibka iyo qandaraasyada dawladda.

## Qodobka 57-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Xeer-Dejinta

1. Golaha deegaanka waxa uu soo saari karaa oo ansixin karaa xeerar uu ku nidaamiyo hawlaha xeerkani uu siinayo D/hoose si waafaqsan dastuurka iyo xeerkan.
2. Dhammaan xeerarka uu soo saaro golaha deegaanku waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda iyo Garyaqaanka Guud, wuxuuna kusoo saarayaa Garyaqaanku Faafinta Rasmiga ah.
3. Haddii Garyaqaanka guud uu garwaaqsado in xeerarka ay soo saareen golaha deegaanku uu ka hor imaanayo dastuurka ama shuruucda kale ee dawladda dhexe waxa uu muddo soddon (30) casho gudahood ah dib ugu celinayaa golaha si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan.
4. Xeer-hoosaadyada ka soo baxa golaha deegaanku masoo rogi karo ciqaab xabsi oo ka badan lix (6) bilood ama ganaax lacageed ka badan 30,000,000 Sh.So.
5. Xeer-hoosaadyada ka soo baxa golaha deegaanka waa inay noqdaan kuwa aan baal marsanayn awoodaha uu xeerkani siinayo D/hoose.

## Qodobka 58-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Heshiis Gelidda

1. D/hoose waxay leedahay awood ay ku gasho heshiisyo la xiriira fulinta hawlaha ku xusan xeerkan.
2. Heshiisyada dawladda hoose ay dhinaca ka tahay, waxaa saxiixaya duqa degmada isaga oo uu goob-joog ka yahay xoghayaha D/hoose wuxuuna saarayaa shaabadda dawladda hoose, isagoo mas'uul ka ah xafidaadda heshiisyada, diwaan-gelinta iyo wixii la mid ah.
3. Heshiisyada la sameeyo iyadoo aan la dhowrin shuruudaha ku xusan faqrada 2-aad ee qodabkan, waa waxba kama jiraan.

## Qodobka 59-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Deegaanka

1. D/hoose waxay gacan ka gaysanaysaa ilaalinta deegaanka iyo ka hor-tagga nabaad guurka, xirmo daaqsimeedka gaarka loo leeyahay, jarista dhirta, laynta ugaarta iyo deegaamaysiyada/magaalaynta khatarta ku ah dhirta iyo daaqa.
2. D/hoose waxay ka hor tagaysaa wasakhaynta hawada, waxayna ka shaqaynaysaa dhiraynta magaalooyinka iyo dayactirka dhulka waxyeelada deegaan ku dhacday.
3. D/hoose waxay fulisaa xeerarka ilaalinta deegaanka ee dawladda, waxayna soo saari kartaa xeer-hoosaadyo ay ku maamulayso deegaanka.

## Qodobka 60-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Ilaalinta Diinta iyo Dhaqanka Suuban

1. D/hoose waxay mas'uul ka tahay noolaynta Shacaa'iirta Islaamiga ah, waxayna ka hor tagaysaa wax kasta oo meel-ka-dhac ku ah ku dhaqanka Diinta Islaamka.
2. D/hoose waxay mas'uul ka tahay habaynta hawlaha aaska (Qubuuraha) iyo astaynta dhulka qabuuraha.
3. Dowladda hoose waxay mas'uul ka tahay abaabulista iyo qabashada xafladaha islaamiga ah sida iidaha.

## Qodobka 61-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Xoolaha, Kalluumaysiga iyo Beeraha

1. D/hoose waxay abuuraysaa suuqyada iibka xoolaha iyo gawraca, waxayna ka hor tagaysaa cudurada ku dhaca xoolaha, iyadoo gacan ka gaysanaysa xaqiijinta caafimaadka iyo xannaanada xoolaha.
2. D/hoose waxay abuuraysaa suuqyada iibka qudaarta, waxayna dhiirigelinaysaa maalgashiga beeraha.

3. D/hoose waxay abuuraysaa suuqyada kalluunka, waxayna gacan ka gaysanaysaa dhiirigelinta kalluumaysatada iyo fulinta xeerarka la xiriira maamulka suuqyada kalluumaysiga ee dawladda.

## Qodobka 62-aad

## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Fanka, Suugaanta iyo Ciyaaraha

1. D/hoose waxay dhiirigelinaysaa fanka iyo suugaanta, waxayna taageero dhaqaale iyo mid farsamo ku bixinaysaa xoojinta fanka iyo suugaanta.
2. D/hoose waxay abuuraysaa kooxo si gaar ah ugu matala degmada tartamada fanka, suugaanta iyo ciyaaraha.
3. D/hoose waxay xaqiijinaysaa dhismaha iyo qalabaynta maktabadaha wax akhriska ee dadweynaha.
4. D/hoose waxay mas'uul ka tahay dhismaha, dayactirka iyo maamulka garoomada ciyaaraha.

## Qodobka 63-aad

## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Horumarinta Ganacsiga

1. D/hoose waxay dhisaysaa suuqyo ganacsi, waxayna u abuuraysaa fursado ganacsi dadweynaha degmada.
2. D/hoose waxay dhiirigelinaysaa warshadaynta iyo maalgashiga degmada.

## Qodobka 64-aad

## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Canshuuraha iyo Ururinta Dakhliga

1. D/hoose waxay ururinaysaa canshuuraha heer degmo, waxayna abuuraysaa ilo dhaqaale oo cusub.
2. D/hoose waxay diyaarinaysaa liis dhammaystiran oo qeexaya noocyada canshuuraha ee degmada, waxayna diyaarisaa xogta dakhliga la ururiyey.
3. D/hoose waxay qiimaysaa noocayada kala duwan ee canshuuraha sannad walba, waxayna soo rogaysaa canshuuro waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 65-aad
## Awoodaha D/hoose Ee La Xiriira Dab-Damiska

1. D/hoose waxay mas'uul ka tahay dab-damiska magaalada, waxayna xaqiijinaysaa in degmadu leedahay agabka dab-damiska.
2. D/hoose waxay ka hor-tageysaa in kaalimaha shidaalka laga dhiso agagaarka guryaha la deganyahay, faras-magaalaha ganacsiga iyo suuqyada ciriiriga ah.
3. D/hoose waxay hubinaysaa inay rugaha ka ganacsiga shidaalka ku rakiban yihiin qalabka lagu bakhtiiyo ama lagula dagaalamo dabka.
4. D/hoose waxay ku soo rogaysaa meheradaha, guryaha, huteelada iyo maqaaxiyaha cuntada inay haystaan qalabka dab-demiska laguna kormeero fulintooda.
5. D/hoose waxay waajib kaga dhigaysaa dhismayaasha nooc kasta oo ay yihiin ku tala-galka qalabka dab-damiska.

# CUTUBKA 6-aad
# XIRIIRKA U DHEXEEYA DAWLADDA IYO D/HOOSE

## Qodobka 66-aad
## Xiriirka Wasaaradda iyo D/hoose

1. Wasaaraddu waxay isku xiraysaa D/hoose iyo hay'adaha kale ee dawladda, waxayna xaqiijinaysaa sarraynta sharciga, ka hortagga musuqmaasuqa iyo si xun ugu takrifalka awoodda.
2. Wasaaraddu waxay dib-u-habayn ku samaynaysaa siyaasadaha iyo xeerarka lagu maamulo D/hoose, waxayna samaynaysaa waaxyo si gaar ah ugu xilsaaran horumarinta awoodda maamul iyo farsamo ee D/hoose.
3. Wasaaraddu waxay dawladda dhexe mas'uul uga tahay ilaalinta danaha dawladaha hoose iyo xallinta khilaafaadka golayaasha deegaanka, isla markaana waxay kormeertaa xil-gudashada golayaasha deegaannada, guddiyada joogtada ah iyo kuwa fulinta.
4. Wasaaraddu waxay xaqiijisaa hirgelinta doorashooyinka D/hoose iyo daadejinta maamulka ilaa heer degmo, degsiimo iyo tuulo.

5. Wasaaraddu waxay kala xadaynaysaa xuduudaha u dhexeeya degmooyinka, waxayna xallinaysaa khilaafaadka dhex mara degmooyinka ee la xiriira soohdimaha.
6. Wasaaraddu waxay xaqiijinaysaa in canshuuraha ay u qaadaan hay'adaha dakhligu D/hoose noqdaan kuwa uu sida sharcigu qabo si dhaqsa ah loogu xawilo D/hoose.
7. Wasaaraddu waxay qiimaysaa awooodda D/hoose, waxayna abuuraysaa mac'hadka tababarka shaqaalaha D/hoose.

## Qodobka 67-aad
## Kaalinta Wasaaradaha La Shaqeeya D/hoose

1. Iyadoon wax loo dhimayn awoodaha xeerkani siinayo D/hoose, Wasaaradaha la shaqeeya D/hoose waxay:
   b. Xaqiijinayaan hirgelinta maamul daadejinta si waafaqsan dastuurka iyo xeerkan.
   t. Dejiyaan siyaasadaha, shuruucda iyo halbeegyada hagaya hawlaha D/hoose uu xeerkani siinayo.
   j. Waxay kormeer iyo korjoogtayn ku sameeyaan tayada iyo tirada adeegyada ay D/hoose siiso dadweynaha.
   x. Waxay taageero farsamo u fidiyaan D/hoose si loo xoojiyo awoodda wax qabad ee D/hoose.
   kh. Waxay shaqaale u wareejiyaan maamulka D/hoose markii ay ka codsadaan si loo xoojiyo awoodda wax qabad ee D/hoose .
   d. Waxay xaqiijinayaan inay D/hoose hesho dakhli ku filan oo ay ku fuliso hawlaha xeerkani siinayo.
   r. Waxay Wasaaradaha iyo hay'adaha dawladdu u wakiilan karaan D/hoose inay u qabato hawlaha ay u-xil-saaranyihiin.

# CUTUBKA 7-aad
# XISAABAADKA, DABAGALKA IYO MIISAANIYADDA

## Qodobka 68-aad
## Habka Xisaabaadka

2. Maamulka D/hoose waa inay ku dhaqmaan hab xisaabeed waafaqsan sharciga iyo nidaamka xisaabaadka dawladda.
3. Maamulka D/hoose waa inay 3-dii biloodba u soo gudbiyaan isuduwaha D/hoose xisaab-xir saddex bilood ah oo faahfaahsan.
4. Xisaab-xirka ku xusan faqrada 2-aad waxay nuqul ka siinayaan xisaabiyaha iyo Hanti- dhawrka Guud.

## Qodobka 69-aad
## Mas'uuliyadda Xisaabaadka

1. Qofka bixiya ama amra in la bixiyo kharash aan sharciga waafaqsanayn ama feejignaan la'aan darteed sabab u noqda maqnaansho hanti D/hoose leedahay waxaa khasab ku ah in uu soo celiyo hantidii la bixiyey.
2. Mas'uuliyadda soo celinta hantida ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan waxay ku dhacaysaa qofka bixiyey ama mas'uul ka ah maqnaanshaheeda, haddii uusan amar qoran ka haysan mas'uuliyiinta ka saraysa ee awoodda xeerku u siinaayo, markaas mas'uuliyadda soo celinta hantida waxay ku dhacaysaa qofkii amray bixinta hantida ku baxday sharci darada.
3. Xaaladaha aan ku xusnayn xeerkan, D/hoose waxay ku dhaqmaysaa xeerarka iyo habraaca xisaabaadka dawladda.
4. Soo celinta ku xusan qodobkan, waxay Wasaaraddu amraysaa in dib loo soo cesho hantidaas wakhti cayiman.
5. Haddii amarka Wasaaradda loo hogaamsami waayo, waxay dacwad u gudbinaysaa hay'daha caddaaladda ee ay qusayso.

## Qodobka 70-aad
## Daba-galka iyo Baarista Xisaabaadka D/hoose

1. Hanti-dhawraha Guud waxa uu baaris ku samaynayaa dhammaan akooonnada iyo xisaabaadka D/hoose, si waafaqsan qodobka 110-aad ee dastuurka dawladda Puntland.
2. Hanti-dhawrku waxa uu samayn karaa baaritaano lama filaan ah iyo baaritaan kasta oo loo baahdo.
3. Hanti-Dhawrku waxa uu warbixintiisa la wadaagayaa;
   - b. Baarlamaanka.
   - t. Wasaaradda.
   - j. Golaha Deegaanka ay qusayso.
4. D/hoose waxay yeelanaysaa qayb u gaar ah dabagalka xisaabaadka oo u-xil-saaran dabagalka iyo hubinta xisaabaadka degmada, ka hor-tagga xatooyada, diyaarinta habraacyada xisaabaadka iyo diyaarinta warbixinnada dabagalka.
5. Qaybta dabagalka ee ku xusan faqrada 4-aad ee qodobkan waxay warbixinnada baaritaanadooda la wadaagayaan golaha deegaanka, waxayna nuqul ka siinayaan Wasaaradda iyo Xafiiska Hanti-dhawrka Guud.
6. Xubnaha qaybta Hanti-dhawrka gudaha ee D/hoose ee ku xusan faqrada 4-aad ee qodobkan waxaa soo magacaabaya guddoomiyaha waxaana ansixinaya golaha, waxayna maamul ahaan hoos tegayaan duqa degmada.

## Qodobka 71-aad
## Miisaaniyadda

1. Miisaaniyadda ku talagalka ah ee D/hoose iyo hay'adaha hoos yimaada waxay ka mid tahay Miisaaniyadda guud ee dawladda, waxayna saldhig dhaqaale u tahay D/hoose.
2. Sannad kasta maamulka D/hoose wuxuu diyaarinayaa Miisaaniyad ku talogalka sannadka soo socda, iyadoo la raacaayo habka iyo tilmaamaha Wasaaradda Maaliyadu ay ka bixiso arrintaas, Miisaaniyaddaas waxa ay ka kooban tahay:-
   - b) Qiyaasta dakhliga iyo kharashka ee sannadka soo socda.

t) Qoraal faahfaahinaya Miisaaniyadda Xisaab xirka 6-dii bilood ee la soo dhaafay si looga cabir qaato.

3. Miisaaniyadda ku talogalka ah waxaa la hor-dhigayaa oo oggolaanaya golaha deegaanka ee degmada, waxaana loo gudbinayaa isuduwaha D/hoose ee Wasaaradda ugu dambayn 30 bisha September.
4. Isuduwaha D/hoose ee Wasaaraddu wuxuu ku lifaaqaysaa hadal qoraalka ku saabsan Miisaaniyadda, ka dibna waxuu u soo gudbinayaa Wasaaradda ugu dambayn 2 bisha October, si ay ugu gudbiso Wasaaradda Maaliyadda looguna daro Miisaaniyadda guud ee Dowladda ee laga ansixinayo Golaha Wakiillada.
5. Miisaaniyadda D/hoose waxa ay dhaqan gelaysaa marka golaha deegaanku oggolaado.
6. Haddii ay u muuqato maamulka D/hoose in uu soo saari karo 6 biloodka dambe ee sannadka dakhli dheeraad ah, waxaa loo oggol yahay in uu soo sameeyo Miisaaniyad ku celis ah oo ay soo oggolaadaan golaha deegaanku lagana ansixiyo Wasaaradda.
7. Haddii baahiyi timaado waxaa 6-biloodka dambe golaha deegaanka ee degmadu guddoomin karaa wareejin lacageed, taas oo awoodeeda oggolaansho loo kala leeyahay sidan soo socota:-

   b. Kala wareejinta dhex marta labada madax-xige oo isku madax ah waxaa lagu ansixinayaa oggolaanshaha golaha deegaanka ay qusayso.

   t. Kala wareejinta dhex marta labada madax-xige ee kala madax ah waxaa lagu ansixinayaa oggolaanshaha heer Wasaaradeed.

8. D/hoose waa in ay sannad kasta samaysaa xisaab-xir 3-bilood ah, mid 6-bilood ah iyo mid sannadeed, oo uu guddoonkeeda leeyahay duqa degmadu, waana in loo gudbiyaa guddiga joogtada ah ee golaha deegaanka oo u sii gudbinaya isuduwaha D/hoose si uu ugu gudbiyo Wasaaradda.

## Qodobka 72-aad
## Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda

1. Wasaaradda iyo hay'adaha kale oo sharcigu u oggol yahay waxay ku leeyihiin kormeer iyo baaris Miisaaniyadda dawladaha hoose iyo xisaabaadkooda.

2. Haddii ay hay'ado kale sameeyeen kormeerka iyo baarista waxaa waajib ah in ay si degdeg ah ugu soo gudbiyaan Wasaaradda warbixin tifaftiran iyagoo dhawraya wakhtiga iyo habka uu tilmaamayo habraaca xisaabaadka dawladdu.

## CUTUBKA 8-aad
## ILAHA DAKHLIGA
## Qodobka 73-aad
## Canshuuraha

1. D/hoose waxay qaadaysaa canshuuraha kala ah:-
   i. Canshuuraha shatiyada ganacsiga ee heerka 1-aad, 2-aad, 3-aad, 4-aad iyo 5-aad.
   ii. Canshuurta shatiyada doonyaha kalluunka iyo tallaagadaha qaboojiya.
   iii. Canshuurta kalluunka, ara-goostada iyo wax soo saarka kale ee badda.
   iv. Canshuuraha beeraha, barkadaha iyo waraha.
   v. Canshuurta degsiimoyaasha.
   vi. Canshuurta makiinadaha shaaha, qaxwaha iyo kuwa cajiinka.
   vii. Canshuurta dhibta xoolaha, xuquuqda tallaalka iyo warqadaha caafimaadka.
   viii. Canshuurta kala-gadashada xoolaha.
   ix. Canshuurta ruqsadaha dhul-bixinta, fasaxa dhismaha iyo dib u hagaajinta guryaha.
   x. Canshuurta qiimaha dhulka.
   xi. Canshuurta suuqa badeecadaha.
   xii. Canshuurta gawraca xoolaha.
   xiii. Canshuurta dhoofinta xoolaha, beeyada, xabkaha, kalluunka, cawda, iyo cusbada.
   xiv. Canshuurta sharaabka iyo qaadka.
   xv. Canshuurta hargaha iyo saamaha.
   xvi. Canshuurta fadhiga baabuurta (Boosteejada).
   xvii. Canshuurta dad dhigidda (dhalashada iyo sugnaanta), guurka iyo furniinka.
   xviii. Canshuurta goobaha maaweelada iyo madadaalinta.
   xix. Canshuurta baallayaasha nalka iyo telefoonada.
   xx. Canshuurta fiilooyinka nalka, telefoonada kor mara ama kan hoos mara.
   xxi. Canshuurta biyaha magaalada.

xxii. Canshuurta xoolaha dhoofa ama kasoo dega dekada iyo garoomada.
xxiii. Canshuurta dejinta iyo raridda badeecooyinka iyo alaabada.
xxiv. Canshuurta Warshadaha iyo wax soo saarka.
xxv. Canshuuraha kala wareejinta hantida guurtada iyo mida ma guurtada ah.
xxvi. Canshuurta dhigashada alaabta ee bannaanka bakhaarka.
xxvii. Canshuuraha jiifka huteelada.
xxviii. Canshuurta gaadiidka dadweynaha.

2. Golaha deegaanka degmada ayaa xeer-hoosaad ku soo saaraya sicirka laga qaadayo mid kasta oo ka mid ah madaxyada canshuuraha ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan.
3. Awoodda jaangoynta iyo qiima u samaynta canshuuraha dawladaha hoose waxa goluhu u go'aaminayaa si waafaqsan habraacyada Wasaaradda, waxna lagama bedeli karo canshuuraha degmada muddo shan (5) sano ka yar.
4. Ka hor intaan golaha deegaanka soo saarin xeer-hoosaadka wax-ka-bedelka canshuuraha uu qodobkaan siinayo D/hoose, waxay ogaysiin siinayaan Wasaaradda si ay u qiimayso, talana uga bixiso wax-ka-bedelka canshuuraha ee degmada ay qusayso.

## Qodobka 74-aad
## Macaashka Ganacsiga iyo Kirooyinka

1. D/hoose waxay samayn kartaa ganacsi iyo kiraynta dhismayaasha iyo dhulka D/hoose haddii dakhli ka soo gelayo.
2. Heshiisyada iyo habka maaraynta ganacsiga iyo kirooyinka ku xusan faqrada 1-aad waxaa laga ansixinayaa golaha deegaanka.
3. Heshiisyada kirada ee D/hoose gelayso waa in loo maareeyaa hab waafaqsan xeerka iibka iyo qandaraas bixinta dawladda hoose.

## Qodobka 75-aad
## Amaahda

1. Goluhu awood uma laha inuu galo kharash ka baxsan Miisaaniyadda oo sababa deyn lagu yeesho golaha.
2. Mas'uuliyiinta saxiixa kharashka u idman ee galay kharash ka baxsan Miisaaniyadda iyaga ayaa mas'uul ka ah deynta ay galeen loona raacayaa, loomana dooran karo mar labaad guddoomiye (Mayor).
3. Waxaa guddiga fulinta iyo mas'uuliyiinta maamulka ka reeban inay dadweynaha, hay'adaha dawladda, shirkadaha IWM ka galaan deyn aaney lacagteedu Miisaaniyadda ku jirin.
4. Haddii ay timaado duruufo degdeg ah sida aafooyinka dabiiciga ah ama arrimo nabadgelyo oo u baahan dhaqaale, Miisaaniyaddana aan ugu jirin, golaha waxaa u furan in uu qaato go'aan uu ku qaato amaah lacageed uu ku daboolo baahidaas isagoo la kaashanaya Wasaaradda.
5. Amaahda ku xusan farqada 4-aad ee qodobkan waa in goluhu ku soo celiyaa muddo aan ka badnayn laba (2) sannadood.

## Qodobka 76-aad
## Deeqaha iyo Kabista Dhaqaale Ee Dowladda dhexe

1. D/hoose waxay ka helaysaa dawladda taageero lacageed oo kala ah:

   b. Taageero lacageed oo dawladdu ku shubto D/hoose si ay ugu fuliyaan mashaariic cayiman, una kharash gareeyaan hab waafaqsan shuruudihii lagu siiyay.

   t. Taageero lacageed oo dawladdu u siiso D/hoose si ay uga fuliso maamul daadajinta iyo gaarsiinta adeegyada loo baahan yahay heer degmo iyo xaafad.

   j. Taageero lacageed oo dawladdu u mariso D/hoose si loogu horumariyo degmooyinka qaar ee horumarkooda gaabiska yahay si ay ula soo sintaan degmooyinka kale ee horumarsan.

2. Dawladdu waxay si toos ah ugu shubaysaa (xawilaysaa) lacagaha taageerada ah ee ku xusan faqrada 1-aad xarfaha ( b, t iyo j) akoonka D/hoose, waxaana lagu maamulayaa si waafaqsan xeerarka maaliyadda dawladda.

## CUTUBKA 9-aad
## DAKHLIGA IYO KHARASHKA
### Qodobka 77-aad
### Uruurinta Dakhliga

1. Dakhliga D/hoose waxaa lagu uruurinayaa lacag cadaan ah oo Sh.Soomaali ah.
2. Lacagaha qalaad ee u soo xerooda D/hoose waxaa loo bedelayaa Shilin Soomaali, waxaana lagu salaynayaa sicirka markaas uu marayo.
3. Lacag kasta oo la qabto waa in lagu bixiyaa rasiid (Warqadda lacag qabashada loogu talagalay).

### Qodobka 78-aad
### Kharashka

1. D/hoose waxay bixin kartaa kharashka loogu oggolaaday Miisaaniyadda oo noqon Kara:
   b. Kharash loogu talagalay socodsiinta hawlaha caadiga ah oo u taagan 60%.
   t. Kharash hirgelinta mashaariicda horumarinta bulshada ee deegaanka 30%.
   j. Iyo kayd 10%.
2. Haddii D/hoose aanay u fulin karin kharashka habka ku xusan faqrada 1-aad duruufo jira awgeed, waxay qoraal u dirayaan Wasaaradda si ay u hubiso inay jiraan duruufo macquula oo keeni kara in laga bayro habka qoondada kharash ee ku xusan faqrada 1-aad.
3. Kharash kasta oo la bixinaayo waa in loo sameeyaa xaashida lacag bixinta oo loogu talagalay inay ku lifaaqan yihiin dukumeenti cadaynaaya kharashkaas, waana in ay saxiixaan dadka sharciga u leh saxiixa iyo qofka lacagta qaadanaaya waana in ay waafaqsanaataa sharciga iyo xeerarka xisaabaadka dawladda.

# CUTUBKA 10-aad
# DEMBIYADA IYO RACFAANKA
## Qodobka 79-aad
## Racfaanka

1. Qof kasta oo cabasho ka qaba go'aamada kasoo baxa D/hoose waxa uu xaq u leeyahay inuu racfaan uga qaato maxkamadda awoodda u leh.
2. Racfaan ka qaadashada go'aamada D/hoose ee ku xusan faqrada 1-aad waxaa loo marayaa si waafaqsan habraacyda dacwadaha maamulka ee u degsan garsoorka.

## Qodobka 80-aad
## Ciqaabaha

1. Cid kasta oo jebisa qodob ama qodobo ka mid ah xeerkan, diida ama is hor-taagta amarada ka soo baxa golaha deegaanka ama saraakiisha u-xil-saaran fulinta hawl kasta oo guluhu leeyahay waxay mudanaysaa ciqaab ganaax u dhexeeya hal malyan (1,000,000) ilaa (10,000,000) toban malyan Sh.So ama xarig u dhexeeya saddex (3) bilood ilaa lix (6) bilood.
2. Fal-dembiyeedyada ka dhasha kana baxsan kuwa ku xusan faqrada 1-aad ee qodobkan, waxaa loo gudbinayaa hay'adaha sharciga ee ku shaqada leh, waxaana loo cuskanayaa Xeerka Ciqaabta Guud.

# CUTUBKA 11-aad
# QODOBADA GUNAANADKA
## Qodobka 81-aad
## Maaraynta Hantida

1. Hantida D/hoose waa hanti dawladeed waxaana loo isticmaali karaa dan-guud oo keliya.
2. D/hoose waxay dejinaysaa hannaan lagu maamulo hantida iyo agabka markaas aan loo baahnayn si waafaqsan sharciga.
3. Habka D/hoose u wareejinayso hantida waxaa go'aaminaya golaha deegaanka oo kala dooranaya xaraashidda, qubidda ama duugista hantida haddii aan isticmaal dambe u harin.

## Qodobka 82-aad
## Soo Saarista Xeer Nidaamiyeyaal

1. Wasiirku wuxuu soo saari karaa isagoo la tashanaya degmooyinka xeer nidaameyeyaal lagu fulinayo xeerkan oo la xiriira:

   b. Arrin kasta oo uu sharcigan oggolaaday in xeer-nidaamiye loo sameeyo.

   t. Hirgelinta iyo fulinta hawlaha ku xusan xeerkan.

   j. Wixii kale ee lagama maarmaan ah ama ah hab la dejiyo si loogu guuleysto ama sare loogu qaado ujeeddooyinka xeerkan.

## Qodobka 83-aad
## Burin/Laalid

1. Waxaa la baabi'iyey wixii xeer ama qawaaniin kale ah oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.
2. Wixii laga waayo xeerkan waxaa loogu noqonayaa xeerarka kale oo aan ka hor-imaanayn Dastuurka Dowladda Puntland.

## Qodobka 84-aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.